Hindisaha DEL ee Sinaanta Qowmiyadaha

Arimaha Jinsiyada Intii aan joogay sharci dejinta waxaan aarkay sida sharciyada dowladu ay si aan sinayn ugu saamayso dadka midabada kala duwan. Sida hay'aduhu ay go'aanka uqaataan iyo sida ufuliyaan barnaamijyada ayaa saamayn wayn ku yeelan karta dadka ay isku dayayaan inay u adeegaan. Maxay tahay sababta ay hay'aduhu tan udanaynayaan sida Waaxda Waxbarashada Hore? Maxaa yeelay Waashintoon waxay noqonaysaa mid sii kala duwan - 44 boqolkiiba qiyaasta tirada caruurta 446,000 da'doodu ka yartahay 5 sano waxay ka kala yimaadeen dad jinsiyad ahaan iyo qowmiyad ahaan asalkoodu kala duwanyahay kuwaasoo ah Hindida Maraykanka/Udhashay Alaska, Aasiyaan, Madow, Isbaanash/Laatino, jinsiyado kala duwan, ama Jasiiradaha Baasifiga. Caruurta midabada leh ayaa ah koox si dagdag ah u badanaya dhamaan caruuraha da'doodu ka yartahay 5 sano, oo hada waa 60 boqolkiiba tirada caruurta da'doodu ka yartahay 5 sano ee ku nool qoysaska dakhligoodu hooseeyo.[1]

Jinsiyada/Qoomiyada Caruurta yaryar ee WA <5 ee Dakhliga Qoysaska, 2015



Inkastoo caruurta midabka leh ay hada tiradoodu dhantahay 46 boqolkiiba tirada caruurta xanaanooyinka ku jira, kalya waxay ka koobanyihiin 38.6% caruurta gasha xanaanada carurta ee u diyaarisa waxa ka horeeya.[2] Oo waan ognahay daloolka fursadu kuma xirmo k-12 ee xirfada ilmaha.[3] Markaan soo gudbinayo hadafka DEL ee ah in 90% caruurta loodiyaariyo xanaanada sanadka 2020, waxaan si niyad ha ugu daray hadalfkaas in jinsiyada iyo dakhliga qoysku aysan go'aamin diyaargarowga caruurta. Anoo taas niyada ku haya, waxaan ha'ada ka sameeyay Hindisaha Sinaanta Jinsiyadaha.

Fursadaha Waashintoon iyo Buuxinta Daloolada ee Jinsiyada / Qowmiyada, 2015-2016 Sanad



Arinta aan diirada saarayno 2017 waa in la aasaas adag loo sameeyo dadaalada hada socda. Tani ma ahan xal dagdag ah oo qanacsanaan keeni karta. Samaynta isbadal muhiim ah waxay qaadanaysaa wakhti iyo adkaysi. Waxaan filayaa in natiijada mudada gaaban ee katimid kooxdayda, waxaan si buuxda ula socda dadaalada mudo dheer iyo istaraajiga la sameeyay oo laga fuliyay shuraakada qoysaka, bulshada midabka leh iyo shuraakada muhiimka ah.

---

[1] Bulshada Qiimaynta/Sahanka ee Marayka (PUMS) 2015 1-xogta sanadka
[2] CARUURTA Waashintoon 6/6 heerarka diyaarinta iyo gaynta xanaanada caruurta
[3] Boqolayda CARUURTA Waashintoon 6/6 iyo Luuqada Ingiriirska, boqolayda heerka SBA (Smarter Balanced Qiimaynta) ee la sameeyay

Waa tan sida qorshaheenu u egyahay:

1. Hormarinta iyo fulinta istaraatijiyada jinsiga qoomiyadaha oo dhammaystiran. Istaratijiyada waxaa kamid ah:
    - Qaab dhismeedka sinaanta jinsiyada ama hababka la wadaagay ee ku hogaaminaya sinaanta. Qaab dhismeedkan waxaa kamid ah hiigsiga nidaamka waxbarashada hore, mabaadi'da, iyo wadaaga isfahamka taariikhiga ah iyo marxalada hada, luuqada/qeexinada, iyo fikradaha muhiimka ah.
    - Qorshaha sinaanta jinsiyadaha ee leh hadafyada gaarka ah, xogta, bartilmaameedyo, iyo mudaanta ku hagaysa saamaynta ugu wayn ee xirida goldaloolada fursada iyo ka wareejinta caqabadaha laga wareejiyo caruurta, qoysaska, iyo xirfadyaqaanada. Qorshahan wuxuu dhisi doonaa Aragtiyada Badalka Sinaanta Jinsiyada ee Waxbarashada Hore. Waxaa kamid noqon doona labada istaraatiijayadood ee tan gudaha iyo mida dibada ee wajahaya barnaamijyada, shuruucda DEL, iyo dhaqamada leh falalka cad iyo hababka la xisaabtanka.
2. Samee oo si joogto ah u dayactir agabka iyo hababka (adoo samaynaya wakhti aad ku aruuriso talooyinka oo aad kaga fiirsato saamaynta qorshaynta iyo qodabada go'aanada) kuwaasoo lagama maarmaan ah marka la fulinayo istaraatiijiyada sinaanta jinsiyadaha, oo ay ku jiraan:
    - *Agabka loogu talagalay in lagu falanqeeyo saamaynta* sinaanta jinsiyadaha ee barnaamijyada, shuruucda, bixinta codsiyada, hindisayaasha, iyo hormarinta miisaaniyada.
    - Dhinaca hay'ada, qoyska, bulshada, iyo maamuuska la howlgalka daneenayayaasha si loo xaqiijiyo in shuruucda iyo go'aamadu ay si wanaagsan ucilmiyaysanyihiin oo ay ku lug lahaayeen kuwa ay saamaynayaan iyo kuwa laga tirada badanyahay.
    - Xogta la aruuriyay iyo nidaamka loogu talagalay in lagula socdo natiijooyinka oo lagu cabiro saamaynta falalka DEL ay ku leedahay ilmaha/qoyska/bulshada iyo natiijooyinka barnaamijyada/hay'ada.

3. Tababar oo taageer shaqaalaha DEL si ay ukobocdo aqoontooda, ogaanshahooda, iyo awooda ay ku hogaaminayaan sinaanta. Talaabada ugu horaysa waa in la isku keeno oo la taageero *Kooxda Sinaanta Jinsiyadaha* kuwaasoo bixin doona hogaan ku saabsan sida loo sameeyo istaraajiyada sinaanta jinsiyadaha, agabyada, tababarka iyo hababka. Xubnaha kooxdu waxay qaabayn doonaan jawaabaha dhaqamda iyo luuqadaha kuwaasoo dhaqan ahaan wanaagsan. Waxay door muhiim ah ka ciyaari doonaan dajinta shuruudaha iyo jawi lagama maarmaan u ah dhexgalka kale ee wadahadalada sinaanta jinsiyadaha iyo dadaalada.

Inkastoo DEL ay ku horayso waxyaabo badan, xaqiiqdii ma nihin kuwii ugu hreeyay wax sidaan oo kale ah sameeya. Caasumada Siyaatal, Gobolka Kinga, Buuget sowndh ESD, iyo tiro kamid ah hay'adaha dowlada ayaa hirgalinayay barnaamijyada sinaanta jinsiyadaha mudo dhowr sano ah. Sharci dajiyayaasha iyo maamulada ayaa si tartiib ah u ogaanayay inaan saamayn karin isbadalka aan doonayno hadii aanan gudaha isbadal ka samayn iyo hagida iyo hogaan la'aanta bulshooyinka.

Aniga ayaa shakhsi ahaan ka qayb qaadan doona tababarada oo waxaa go'aanada aan qaadanayo iga hagi doona Kooxda Sinaanta Jinsiyadaha iyo maareeyaheeda, Everre Jasper. Anoo ah nin cadaan ah oo ka socda Maykarasofti iyo Sharciga, waxaan ku dadaalayaa inaan DEL ku hogaamiyo inay saaxiib unoqoto dhamaan adeeg bixiyayaasheena, qoysaska, iyo caruurta. Hadafkaygu waa inaan ka faa'iidaysano fursadahan cajiibka ah ee aan hayso si aan uxirno galdaloolda fursda ee aan fiicnayn ee joogtada ah. Waxaan rajaynayaa inaan kusoo biirtaan shaqadan muhiimka ah ee xiisaha leh.

Ross Hunter

Agaasimaha Washington State Department of Early Learning (Waaxda Waxbarashada Hore ee Washington)

Akhri qoraalkayga ku saabsan taageerada DEL ee ka qaybgalka iyo dulqaadka.

Ma rabtaa inaad wax badan ka ogaatid hindisaha iyo halka ay shaqada DEL marayso ee ciribtirka takoorka ee qoondeeya diyaargarowga xanaanada caruurta? Booqo boggan.